# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1043
# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS
# CHAPTER 3:15-4:1

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

O**PENING SIGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin.

Isagoo hoga-tusaalaynaya masiixyiintii wakhtigiisa iyo weliba kuweenna maata nool, ayaa waxaa rasuuul Butros haatan uu wax ka leeyahay wada noolaanshaha ninka iyo naagta is-qaba. Waxaana rasuulku leeyahay, sida ku qoran Warqaddiisii kowaad cutubka 3:1. Waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Sidaas oo kalena, dumar yahow, ninmankiinna ka dambeeya in xataa haddii qaar uusan erayga addeecin**

**ay erayga la'aantii ku soo hanuunsamaan dabiicadda afooyinkooda."**

**SONG: REEL---CUT------**

Markii noogu dambaysay dhegaysayaal waxay inoo joogtay faalladii aayadii 14aad oo khusaysay kala duwanaanshaha qofka Masiixa raacsan iyo kuwa aan Masiixa raacsanayn iyo sida ay labaduba dhibaatooyinka noloshooda ku yimaada ay kaga jawaabaan. Kuwa masiixiyiinta ah dhibaatooyinka nolosha faraxad bay u qaataan, oo welibana khibrado ayey ka saa'idsadaan dhibaatooyinka haya. Haddaba Masiixu wuxuu inoo sheegay hadiyadaha aynu helayno markii dhibaatooyinka aynu u adkaysanno.

Ciise Masiix nolosha masiixinnimada marnaba kama dhigin sida mid barwaaqo la dhex-dabaalanayo. Waa nolol u baahan halgan iyo, samir iyo adkaysi iyadoo aan la ilaawaynin in Ilaah yahay kan keliya ee leh awoodda. Habase yeeshee waxad moodda in rsuulku aayadda xigta inogu bal-ballaarinayo wixii aynu kaga soo hadalnay aayadda 15aad.

Waxaana qorniinku leeyahay sida ku qoran Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 3:15, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Rabbiga u ahaada inaad u jawaabtaan nin alla ninkii wax idinka weyddiiya sabab ku saabsan rajada aad leedihiin, laakiinse qabow iyo cabsi ugu jawaaba."**

Marka ay sidan tahay waxaa dabiicaddeenna deggan iyo qabwonimadayada ay ka yaabinaysaa kuwo badan oo aan haysanin deganaanta iyo qaboobiday aynu haysanno. Waxaanay ina weyddiiyaan had iyo goor waxa keenay qaboobida iyo degganaanta, oo sida badan ay dadka qaarkii ugu yeeraan, **"Reer magaalnimo."** Waxay

rumaysan yihiin in ninka reer magaalka ah uusan dhibaatooyinka uga jawaabin sida kan reer Baadiyaha ah ama xoola-dhaqatada ah. Habase yeeshee waa qofka masiixiga ah kan akhyaarka ah oo dhibka u adkaysta, oo weliba faraxsan inkastoo uu dhib ku jiro.

Waxaa haddaba loo baahan yahay in qofku aqoon dheer u leeyahay kitaabka, si markaa haddii dadka inagu xeeran ay ina weyddiiyaan is-beddelkeenna cajiibka ah aannu si tafatiran wax ubu kala dhigno. Waxaase ayaandarro ah inay jiraan rag iyo dumar fara badan oo masiixiyiin ah, balse aan waxba ka garanaynin kitaabka. Markaasaa nolosha masiixinnimadu ku adkaataa ama xujo ku noqotaa.

Waxaad arkaysaa kuwo badan oo khamri cabaya oo haddana ku leh waxaynu nahay masiixyiin. Qofka masiixiga ah khamriya cab maahan, sigaarna ma cabbo, qaadna ma cuno, wuxuuse qalbigiisa u banneeyaa in Ruuxa qoduuska ahi degganaado. Sababtaas aawadeed ayaa loogu baahan yahay in dadku marka hore bartaan kitaabka si ay ugu fududaato nolsoha masiixinnimada.

Waxaan arkay masiixyiin badan oo Soomaali ah oo moodi jiray in khamriga loo fasaxay. Meel ka tirsan kitaabka oo sakhradda fasaxaysaa ma lahan. Waxaase kitaabku leeyahay: "...**Rabbiga Masiixa ah qalbiyadiinna qoduus kaga dhiga**....." Waxaa la doonayaa inaad mar waliba Ilaah ka fakartaan oo aad xusuusataan waxyaabaha inoogu qoran kitaabka si aynu qalbiyadiinna qoduus kaga dhigno Ilaah hortiisa ama jaahiisa.

Taasina waxyaabo badan oo faa'iido ah ayey noloshayada keeni lahayd. Waxaa nebi Xabaquul uu

leeyahay sida ku qoran kitaabkiisii Xabaquuq 2:20, isagoo ka hadlaya sida ay u ahmiyad ballaaran tahay in Rabbiga kasha iyo laabta laga ammaano oo welibana qoduus looga dhigo, leeyahay sidatan:

**"Laakiinse Rabbiga waa ku jiraa macbudkiisa qoduuska ah, haddaba inta dhulka joogta oo dhammu ha ku hor aamuseen."**

Markii maalmaha Axadda aad tegayso wehlenimada ayaa dunida oo dhaniba ay shaqo ku sii jeeddaa, qaarkooda aan shaqada lahaynna waxay ku sii jeedaan inay qaad soo jamlaystaan ayaa waxaa laga hadlayaa siyaasad iyo hadallo tororog ay iyo qabiil. Marka ay sidaas tahayna dunidu way bulxamaysaa oo Ilaah kuma hor aamusna. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska Warqaddan kowaad, ayaannu eegaynaa aayadda 16aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

**"Idinkoo qalbi wanaagsan leh, in markii wax xun laydinka sheego, ay ceeboobaan kuwa caaya dabiicaddiinna wanaagsan ee xagga Masiixa ah."**

Marka dhdanka kale laga eego, kuwa adiga ku xamanaya ama xumaanta kaa sheegaya way khaldan yihiin. Waxaa la doonayaa haddii aad maqasho kuwa kugu xamanaya wax aadan ahayn, inaadan kaba sii fakarin, waayo runtu way imanaysaa gooray ahaataba, waana laguu markhaati-furi doonaa. Maahan in kuwa ku xamanaya ay wakhti kaa lumiyaan adigoo markaa iyaga doonaya inay gartaan inaad nin wanaagsan tahay.

Aniga qudhayda ayey taas khibrad ahaan ila soo gudboonaatay, waxaanan gartay markii aan qofka kala hadlayo wax aniga igu saabsan iyo wanaaggayga inay ku adag tahay inuu aamino ama rumaysto waxa aan u

sheegayo. Waxaaba laga yaabaa inuu u qaato si kale oo ay ula muuqato inaad hortiisa isku faaninayso, ama aad been u sheegayso oo aad ka qarinayso waxa aad dhab ahaantii tahay. Markaa haddii dhibaatadaas ay ku hayso ama horey kuula soo gudboona-atay, dawadeedii waa la helay.

Waxaana Rasuul Butros leeyahay haatan: **"Idinkoo qalbi wanaagsan ama niyo wanaagsan leh, in markii wax xun laydinka sheego, ay ceeboobaan kuwa caaya dabiicaddiinna wanaagsan ee xagga Masiixa ah."** Markaa weligaa ha noqon nin wanaaggiisa ka warrama ama jecel inuu dadka ammaan ka helo, inkastoo waxa ay samaynayso ay hagaagsan yihiin.

Iyagu ha gaareen go'aankooda ah sida aad tahay, adiguna qalbigaagu ha wanaagsanaado mar waliba oo xumaan lagaa sheego, waayo runtu way soo baxaysaa. Dawadu waxa weeye inaan waxba laga oran wax waliba ee laynaga sheego oo xumaan ah. Dadka xumaanta kaa baafinaya ayey dhibaatadu haysanaysaa, waayo wakhti badan ayey ku luminayaan hadallo been ah marka kowaad.

Marka labaadna Ilaah bay dembi ka gelayaan markii ay been kaa sheegaan, markaa adigu waxaad beri ka ahaanaysaa beentooda, oo innaba ka welweli maysid. Warku wuxuu iman Cakaaro marka ugu dambaysa. Haddaan ku soo noqonno meeriska csharkayaga caawa ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 3:17, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, haddii ay doonista Ilaah tahay, waxaa ka wanaagsan inaad samafalidda u xanuunsataan intii aad u xanuunsan lahaydeen sharfalidda."**

Haddii aad haddaba u xanuunsato Masiixa awgii, waxaa farxad kuu ah hadalladan kore, markaasoo rasuulku leeyahay, **"Waayo, haddii ay doonista Ilaah tahay, waxaa ka wanaagsan inaad samafalidda u xanuunsataan, intii aad u xanuunsan lahaydeen sharfalidda."** Waxaan filayaa inaad garateen waxay rasuulku ka hadlayo marka uu leeyahay samafalidda. Haddii aydaan wax dembi ah samaynin, oo laydin caayo, ama laydinka been-abuurto oo sidaas aawadeed aad u dhibtootaan, waxaa kuu wanaagsan inaad u adkaysato inkastoo lagu nabiibayo, oo wax aadan samaynin laguugu leeyahay wuu sameeyey. Waxaa ka xun in aad xumaan samayso, oo laguugu helo, oo haddana xumaantaadii laguu ciqaabo.

Waxaad garanaysaa in dembigaagii la soo saaray, oo waxa kuugu dhacayaana aad u qalanto. Rasuulkuna wuxuu adkaynayaa sida loogu baahan yahay in qofka wanaaggiisa iyo daacad nimadiisa awgeed uu u dhibtoodo intii sharfalid ay dhibaato ka soo gaari lahayd. Way xanuun badan tahay in khaa'innimo aad samaysay laguugu qabto. Dabadeedna laguugu dilo, ama lagaa aargoosto. Waxaa ka wanaagsan inaad daacad ahaato oo xitaa daacadnimadaada aad dhibaato waliba u gasho si aad Ilaah markhaati ugu ahaato. Haatanna waxaannu soo gaarnay maaddada kale ee khusaysa:

## SILICA MASIIXA OO HOREY LOOGU SII WAXYIYEY NUUX

Si bal aynu arrinkaas waxyiga wax kaga ogaanno ayaa waxaa muhiim ah inaad la soo kala baxdaan isla baalka 408 ee Axdiga Cusub, Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 3:18, waxaana qoran sidatan:

**"Maxaa yeelay, Masiixba mar buu u xanuunsaday**

**dembiyada, Isagoo xaq ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood inuu inoo keeno Ilaah. Xagga jidhka waa laga dilay, laakiinse xagga ruuxa waa laga nooleeyey."**

Waa ay ahmiyad ballaaran tahay inaynu garanno in Masiixa uu noqday aadami, waana aadaminimadiisa tii keentay inuu inoogu dhinto isku tallaabta. Wuxuu inoogu dhintay isku tallaabta, waana Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah kii ka soo sara-kiciyey dhimashada. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka ayaannu imminkana idiin kahriyeynaa 3:19, waxaana qoran sidatan soo socota:

**"Ruuxii ayuu ku tegey oo wuxuu wacdiyey ruuxyadii xabsigii ku jiray."**

Haddaba waxaad mooddaa in qidcadan kore ay tahay tan sida weyn loo garan la' yahay. Waxaana fure u ah aayaddan 19aad fahamkeeda tan 20aad ee xigta, waxaana rasuul Butros leeyahay sidatan:

**"Kuwaas oo waagiii hore ahaa caasiyiin markii dulqaadashada Ilaah ay sugaysay intii maalmihii Nuux oo la diyaarinayay doonnidii, taasoo ay biyihii kaga badbaadeen dhawr qof oo ah siddeed nafood oo keliya."** Haddaba goorma ayuu Masiixu dadka ku wacdiyey Ruuxa? Waase goorma goorta, dulqaadashada Ilaah ay sugaysay intii maalmihii Nuux oo la diyaarinayay doonnidii?

Waxaa nebi Nuux ka dul hadlayey Ruuxii Masiixa weliba maalmahaas hore markii uu la hadlayey dadkii wakhtigiisa, haddana farriintii Nuux way diideen. Taas ayaa loola jeedaa marka qorniinku leeyahay, "...Kuwaas oo waagii hore ahaa caasiyiin markii dulqaadashada Ilaah ay sugaysay intii maalmihii

Nuux." Haddaba, kuwii diiday ciqaab baa sugaysay. Waanay heleen, oo waxaa dusha laga saaray ciqaab aad u xun oo weyn oo iyada oo akel aan horey loo arag markii Ilaah furay irdihii samada oo roob aan horey loo arag lagu maansheeyey. Masiixu wuxuu markaas iyada ah ka kor hadlayey Nuux, waxaana lagu sugayey dadka dulqaadasho inta ay kaga soo noqonayaan Ilaah, laakiin ma dhicin. Habase yeeshee markii Masiixu samada aaday, kaddib qodbiddiisii, cidna kama uusan dul-hadlaynin.

Balse wakhtigii Masiixa, kuwii diiday Masiixa waxay diideen isla farriin la mid ah tii Nuux. Waxaana loo jeedaa in kuwa diiday dhimashadii Masiixa, waxaa iyagana ku soo degaya ciqaab la mid ah tii Nuux dadkiisii ku soo degtay. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal ayaannu imminka idiin akhriyeynaa meeriska cutubka 3:21, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

**"Biyahaasunaa waxay ka dhigan yihiin baabtiiska hadda idinku badbaadiya sarakicidda Ciise Masiix, oo aan ahayn ka fogaynta wasakhda jidhka, laakiinse waxaa weeye baryo ka timaadda qalbi wanaagsan oo xagga Ilaah."**

Marka uu leeyahay rasuul Butros, **"Biyahaasuna waxay ka dhigan yihiin baabtiiska hadda idinku badbaadiya sarakicidda Masiixa,"** ayaa su'aasha soo baxaysaa ay noqonaysaa Baabtiiskee ama makhuuriskee buu ka hadlayaa? Wuxuu ka hadlayaa baabtiiska Ruuxa Qoduuska ah, laakiin ka hadli maay kan biyaha laysku sayriyo.

Baabtiiska Ruuxa Qoduuska ah waa mid dhab ah, laakiin kan biyaha waa mid dhaqan ama caado ah.

Imminka waxaan rumaysanahay makhuuriska biyaha, waxaan kaloo rumaysanahay in biyaha laysku mukhuuriyo taasoo astaan u ah in noloshayadiina la dhaqay isla sida oogada laynooga dhaqay. Markaa waxaan idiin sheegayaa in tan ahmiyadda leh inay tahay Baabtiiska Ruuxa Qoduuska ah, waayo iyada ayaa kuugu dhex makhuurin karta ururka Masiixa. Waayo waxaa rasuul Butros leeyahay:

**"....oo aan ahayn ka fogaynta wasakhda jidhka, laakiinse waxaa weeye baryo ka timaadda qalbi wanaagsan oo xagga Ilaah."**

Haddaba biyaha maahan waxa dhaqi kara najaasada ruuxa ama nafta aadmiga, waxaa dhaqi kara oo keliya Ruuxa Ilaah, waxaana laynagu badbaadinayaa sarakicidda Ciise Masiix--ama rumaysadka aynu rumaysannahay in Masiixu uu dhimashadii ka sarakacay. Taasoo ku timid shaqada Ruuxa Qoduuska ah ee noloshayada cusboonaysiisay.

Haddaan imminka soo gunaanadno meeriska cutubka 3aad, ayaannu isla eegaynaa Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 3:22, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

**"Ciise Masiix jannaduu galay oo wuxuu joogaa gacanta midigta oo Ilaah, oo malaa'igaha iyo kuwa amarka leh iyo kuwa xoogga leh oo dhanba waa laga hoosaysiiyey isaga."**

Haddaba aayadd waxay ka hadlaysaa Sayid Ciise Masiix. Aniga iyo adiga waxaynu nahay dembiileyaal, laakiin isaga ayeynu u imanaynaa ooq aabilaynaa, waxaanan ku biiraynaa jameecada Ilaah badbaadiyey ama soo furtay. Waxaa kaloo laynagu dhex makhuuriyey Masiixa waayo Masiixu wuu ka kacay dhimashada, oo

maantana wuxuu Masiixii sara-kacay hareer fadhiyaa gacanta midig ee Ilaah. Haddaan intaas ku soo koobno dhegaystayaal cutubkii saddexaad ayaan hubaa inaad waxyaabo waaweyn ka barateen. Waxaana aniga aad ii taabtay aayadda 16aad. Waxaan bartay haddii dad wax iga sheegaan, inaanan welwelin waayo wax kastoo ay leeyihiin ama ay igu xamanayaan, haddaanay run ahayn, iyaga ayey wakhti iyo tamarba ka dhamaynaysaa, welibana Ilaah dembi buu dusha ka saarayaa beentooda awgeed.

Waxaana Rasuulku yiri, haddaan idiinku celiyo aayaddii 16aad sidatan soo socota:

**"Idinkoo qalbi wanaagsan leh, in markii wax xun laydinka sheego, ay ceeboobaan kuwa caaya dabiicaddiinna wanaagsan ee xagga Masiixa ah."** Dadku waxay doonaan bay leeyihiin, laakiin cuqdad ha ka qaadin xitaa hadday ku yiraahdaan gabadhaasi waa kuwa jidhkooda iibsada, ama haddii aad tahay qof rag ah, kaasu waa tuug, ama waa xumaan fale. Ugu dambaynta runta ayaa soo baxaysa, qofkii hadalka kuugu yirina waxaa ka khasaaraya wakhti inta uu beenta faafinayo, markaa shaqo ha ku yeelan wixii ay ku yiraahdaan. Aalaaba dagaal cidi kula soo aadi mayso, afka un baa laga hadlayaa.

Waxaana loo baahan yahay in garaadkaaga wanaagsan uu ku xukumo ama xakameeyo, adigoo og in dabiicaddaadu ay xagga Masiixa ka nuurayso ama ifayso. Haddaba dhegaystayaal waxaan is-leeyahay anigu aayaddaas wax weyn bay idin taraysaa kuwiinna masiixyiinta ah. Hadda kaddibna ha ka welwelina waxa dadka kale idinka sheegaan. Waxaannu soo gunaanadnay meeriska cutubka 3aad, waxaanan si

dawaali ah idiinku bilaabaynaa:

**CUTUBKA 4AAD EE WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS.**

Marka ay sidan tahay waxaannu ku bilaabaynaa mawduuca cutubkan 4aadi xoogga saarayo, waxaana weeye, ama rasuulku horey u sii wadayaa in silicu keeno ama dadka siiyo adeecista Ilaah ay ku addeecayaan doonistiisa. Haddaba qaybtan qorniinka ah ee warqaddan rasuul Butros waxay caddaynaysaa in markii noloshu ay fududaato ama raaxo la helo, in laga tago tubtii Ilaah oo waxbaris kasta oo kale loo nuglaado.

Haddaba sababtaasaawadeed Ilaah silic ama rafaad ama murugo ayuu nolosha qofka Masiixiga ah ku soo daayaa si uu isaga kaga fakaro. Haddaba kuwa Masiixa u markhaati furaya ee dhallinyarada ah ayaa mararka qaarkood waxay yiraahdaan, waxaannu masiixa u soo raacnay inaan tubtii hore ama jahadii hore ee aynu ku soconnay isaga tagno.

Haddaba qofku jihayn ama tub cusub qaadi maayo ilaa uu la kulmo silic. Nebi Daa'uud wuxuu soo saaray silicaas, oo wuxuu leeyahay sida ku qoran Sabuurka 66:10 sidatan:

**"Waayo, Ilaahow, adigu waad na imtixaantay, Oo waxaad noo tijaabisay sida lacagta loo tijaabiyo."**

Markaa nebi Daa'uud wuxuu la kulmay dhib iyo rafaad. Waxaase silica iyo rafaadka ama dhibku ku soo dhoweeyey Ilaah, oo taasina waxay u horseedday inuu noloshiisa ku addeeco Ilaah intii ka harsanayd noloshiisa kaddib markii uu arkay jirrabaadda. Ilaa wuxuu ina geliyaa innaga mixno iyo hdib si aynu waddo cusub u qaadno, waana waddada hanuunka iyo dib ugu

noqoshada Ilaah. Markaa Ilaah dan buu ka leeyahay silica noloshayada soo gelaya, ama murugada iyo xiisadaha daran. Haddaan imminka idiin bilawno dhegaystayaal meeriska cutubka 4aad, ayaa waxaannu ku bilaabaynaa aayadda 1aad, waa baalka 408 ee Axdiga Cusub e, waxaana rasuul Butros leeyahay sidatan:

**"Mar haddii Masiixu jidhka ku xanuunsaday, idinkuna sidaas oo kale isu diyaariya, idinkoo isku maan ah; maxaa yeelay, kii jidhka ku xanuunsada waa ka joogsaday dembiga."**

Waxaan haddaba aayaddaa fahamkeeda kala kulmay dhib wakhti hore, haatanse Ilaah baa ii bidhaamiyey faham cusub. Berigii hore xitraa way igu adkayd inaan dadka la wadaago ama aayaddaas wax ka baro. Welibana qoraayaasha kale ayey ku adkayd inay turjumo waafi ah ka bixiyaan aayaddan kowaad ee cutubka 4aad ee Warqaddan kowaad ee rrasuul Butros.

Waxaan ku kalsoonahay in Ruuxa Ilaah ina siinayo faham aynu ku garanno fahamkeeda. Waxaanan idinkula talinayaa dhegaystayaal haddii aayadaha qaar aad garan weydaan inaad Ilaah baryo hor dhigtaan oo aad tiraahdaan **"Ilaahow ii nuuri aayaddan ku qoran Injiilka Masiixa, si aayaddu ay noloshayda waxtar ugu yeelato.."**

Marka uu leeyahay, Mar haddii Masiixu jidhka ku xanuunsaday, ayuu rsuulku inoo tilmaamayaa aayadda 18aad ee isla Waraddan kowaad, cutubkeeda 3aad, markaasoo uu lahaa: **"Maxaa yeelay, Masiixba mar buu u xanuunsaday dembiyadayada isagoo xaq ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood inuu inoo keeno Ilaah."**

**SONG: REEL----CUT-----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin